



## WARMURTIYEED

**MADASHA AQOON ISWEYDAARSIGA XOGHAYEYAASHA GUUD EE  
GOLAYAASHA XEER-DEJINTA JAMHUURIYADDA FEDERAALKA  
SOOMAALIYA**

**28 -29 Sebteembar 2020**

**Muqdisho Soomaaliya**

Waxaa kulan aqoon isweydaarsi oo ay isugu yimaadeen Xoghayeyaasha Golayaasha xeer-dejinta Soomaaliya muddadii u dhaxeysay **28-29 Sebteembar 2020**, oo ku qabsoomay xarunta Aqalka Sare Baarlamaanka Federalka Soomaaliya ee Muqdisho, si waafaqsan Xeer-hoosaadka Aqalka Sare Qodobkiisa **13 (6)** iyo **Qodobka 6 (2)** ee Heshiiska is af-garadka Golaha Guddoonnada xeer-dejinta Soomaaliya qormada 3-aad, Baydhabo **27-28 Diseembar, 2017**.

Madasha Xoghayeyaasha Guud waxaa looga hadlay arrimaha kala ah;

1. In la xoojiyo lana joogteeyo xiriirka, iskaashiga iyo wada shaqeynta Xoghayeyaasha Guud ee Golayaasha Xeer-dejinta Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
2. Intii uu shirku socdey, Xoghayeyaasha Guud waxay soo bandhigeen waxqabadka mudadii ka dambneysay shirkii 5aad ee Xoghayeyaasha Guud 30 Maarsa 2019.

3. Waxaa la garowsaday muhiimaddii uu lahaa mashruucii Gole-kaab ee taageeri jiray Golayaasha xeer-dejinta.
4. Madashu waxay ka hadashay baahida loo qabo tayeynta Howl-wadeenada Golayaasha xeer-dejinta.
5. Waxaa diiradda lagu saaray muhiimada uu leeyahay hannaanka Maareynta Maaliyadda Dadweynaha (PFM) iyo doorka ay ku leeyihiin Golayaasha xeer-dejinta, si loo xoojiyo isla xisaabtanka iyo daahfurnaanta.

Haddaba Madasha Xoghayeyaasha Guud ee Goloyaasha Xeer-dejinta waxay soo jeedinayaan:

1. In kulamo wadajir ah la yeeshaan deeq bixiyayaasha iyo hay'adaha caalamiga ah ee la shaqeeya Baarlamaanada, si loo suurtogeliyo wax ka qabasha baahiya Baarlamaannada.
2. In sare loo qaado tababarada tayo-kordhintu wadajirka ah ee Guddiyada iyo shaqaalaha Baarlamaannada.
3. In la xoojiyo lana joogteeyo xiriirkha Guddiyadda Baarlamaanada ee isku shaqada ah.
4. In la xoojiyo aqoonta iyo khibradaha la xiriirta adeegsiga tiknoolojiyada casriga ah, laguna tababaro hawl-wadeennada adeegsiga qalabka casriga ah.
5. In si gaar ah guddiyada iyo hawl-wadeennada loogu tababaro meertooyinka miisaaniyadda, gorfeynta iyo diyaarinta warbixinnda miisaaniyadda dawladda, si loo hirgeliyo Maareynta Maaliyadda Dadweynaha (Public Financial Management) iyo xoojinta hannaanka daah-furnaanka iyo isla xisaabtanka.
6. Madashu waxay soo jeedinaysaa in Baaralamaanada DXDF laga caawiyo qabsoomidda doorashada 2020-2021 xubnaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka JFS.
7. Madashu waxay soo jeedinaysaa in la qabto kulankii 6-aad ee Af-hayeennada Goleyaasha Xeerdejinta Jamhuuriyadda Federaalka

Soomaaliya, si loo xoojiyo wadasheqeynta, katashiga iyo jiheynta mashaariicda 2021-2022.

## **Ugu Dambeyn**

Xoghayayaasha Guud ee Golayaashaha xeer-dejinta Soomaaliya waxay uga mahad celinayaan mashruuca Damal/USAID marti gelinta Madasha Xoghayeyaasha Guud ee Goloyaasha Xeer-dejinta Soomaaliya.

### **Xoghayayaasha Guud ee Golayaashaha xeer-dejinta Soomaaliya:**

- |                                |   |
|--------------------------------|---|
| 1. Cabdbdkarim X.Cabdi Buux    | X. Guud Golaha Shacabka                   |
| 2. Cali Maxamed Jaamac         | X. Guud Aqalka Sare                       |
| 3. Cabdirisaaq Warsame Xiddig  | X. Guud Golaha Wakiillada Puntland        |
| 4. Maxamed Cabdinuur Kilaas    | X. Guud Golaha Wakiillada Jubbaland       |
| 5. Dr. Liibaan Abuukar Cusmaan | X. Guud Golaha Wakiillada Koonfur-galbeed |
| 6. Xassan Maxamuud Faarax      | X. Joogtada Baarlamaanka Galmudug         |
| 7. Cabdiwaaxid Maxamed Xuseen  | X. Guud Golaha Wakiillada Hirshabeelle.   |